

**Sharci 20 febaraayo 1958, lamba. 10**

**Amargooyada Caddaaladda Militariga, ee gudaha Soomaaliya**

## **MAAMULAHA**

Markuu arkay oggoaansha (ansixinta) Golaha Xeerdejinta

### **WUXUU SOO SAARAYAA**

Sharciga soo socda:

#### **Qod. 1**

##### **Xubnaha iyo Ikhtisaaska Maxkamadda Militariga**

Maxkamadda Militariga, ee Soomaaliya waxa ay xarun ku leedahay Muqdisho, agagaarka Xafiiska Garsooraha Gobolka Benaadir.

Waxa ay ka kooban tahay garsooraha Gobolka, oo guddoominaya, iyo laba xubin-guddiyeedyo oo militari ah.

Waxa ay ikhtisaas iyo awood xagga maadada ciqaabta militariga sida sharcigu qabo.

#### **Qod. 2**

##### **Xubnaha iyo Ikhtisaaska Maxkamadda Militariga, ee Racfaanka**

Maxkamadda Militariga, ee Racfaanka, ee Soomaaliya waxa ay xarun ku leedahay Muqdisho, agagaarka Xafiiska Garsooraha Racfaanka.

Waxa ay ka kooban tahay Garsooraha Racfaanka, oo guddoominaya iyo laba xubin-guddiyeed oo militari ah.

Waxa ay dhegeysataa (ka gar-naqdaa) racfaannada laga soo qaato xukunnada Maxkamadda Militariga.

#### **Qod. 3**

##### **Ikhtisaaska Maxkamadda Caddaaladda**

Maxkamadda Caddaaladda, ee Soomaaliya, marka la joogo dacwadaha ciqaabta, waxa ay dhegeysataa oo ay ka gar-naqdaa cabashoyinka lidka ku xukunnada Maxkamadda Militariga, ee Racfaanka, gudaha hadba xuduudda iyo habraacyada farayaan ay sharciyadu u dejinayaan (u-dhigayaan) cabashooyinka caadiga ah ee xagga maadada ciqaabta.

#### **Qod. 4**

##### **Xeerarka Ciqaabta ee la Dabbaqi karo**

Ilaa iyo goorta uu ka dhaqangelayo Xeerka Ciqaabta Militariga, ee Soomaaliya, Maxkamadaha Militariga iyo Maxkamadda Caddaaladda, ee Soomaaliya xagga maadada Militariga waxa ay sii-dabbaqayaan Xeerka Ciqaabta Militariga, ee Talyaaniga.

#### **Qod. 5**

##### **Awoodaha Xeerilaaliyaha**

Dhaqaajinta dacwada ciqaabta, xagga dembiyada militariga, waxaa lagu oogayaa dalabka (codsi) ka yimaada Taliyeyaasha Militariga ee ikhtisaaska u leh ama Xafiiska Xeerilaaliyaha Guud, ee caadiga ah, si waafaqsan qodobka 16aad, ee Xeerka Nidaamka Garsoorka, ee Soomaaliya.

**Qod. 6**  
**Xeerka Habka ee Militariga**

Garma-gallada (dacwadaha ka socda Maxkamadda Militariga, Maxkamadda Militariga, ee Racfaanka iyo Maxkamadda Caddaaladda xagga maadada militariga waxaa loo raacayaa Xeerka Habka Ciqaabta, Xeerka Nidaamka Garsoorka, ee Soomaaliya iyo amarrada nidaameed ee 24 febaraayo 1956, lamba. 29 iyo 23 Maarso 1956, lamba. 32.

**Qod. 7**  
**Xubno-guddiyeed Militari**

Xubno-guddiyeedka militariga waxaa laga soo saaraa diiwaan, uu sanad waliba sameeyo Guddoomiyaha Maxkamadda Caddaaladda, kana kooban saraakiil ka kala tirsanciidan kasta iyo takhasus kasta.

Kuwa ku qoran diiwaanka waxaa lagu sii kala qaybiyaa xagga derejada militari.

Xubno-guddiyeedka militariga ah waxaa sanad-sanad loogu magacaabaan Amar uu soo saaro Maamulaha, kaddib soo-jeedinta Wasiirka Arrimaha Gudaha, oo dhegeystay Golaha Wasiirrada.

Ugu yaraan saddex maalmood, ka hor dhegeysiga dacwadda ee Maxkamadda Militariga, xubno-guddiyeedka, lagu talagiyo in ay qayb ka noqdaan, Guddoomiyaha Guddiga ayaa qori-tuur (baqiyaa-nasiib) kaga soo dhex saaraya kuwa (daka) ku qoran diiwaanka ee haysta derejo militari.

Sare, ama ugu yaraan la eg, kan ugu derejada sarreeya, ee kuwa la xukumayo (la maxkamadeynayo).

Xubno-guddiyeedka waxaa qoritur (baqtiyaanasiib) lagu soo saaraya ayaga oo ah tiro saddex ah. Labada hore waa kuwa rasmiga, kan saddexaadna waa xil-suge (ku-sime/jago-buuxis u taagne).

Xeerilaaliyuhu waxa uu goobjoog ka naqonayaa qori-tuurka xulka xubno-guddiyeedka.

Xubno-guddiyeedka Maxkamadda Militariga, ee Racfaanka waa in ay haystaan derejo militari, ee sare, ama ugu yaraan la eg kan ugu derejada sarreeya xubno-guddiyeedka Maxkamadda Militariga oo xukunkeeda racfaanka laga soo qaatay.

Inta ayasan qaban xilkooda, xubno-guddiyeedku (xubno-guddiyeedyada) waa in ay dhaar ku maraan Guddoomiyaha hortiisa, si waafaqsan qaab-dhaareedka uu sharcigu u dejiyey xubno-guddiyeedka Maxkamadda tashiga leh (assise).

**Qod. 8**  
**Baabiin Xeer**

Waxaa la baabi'iyey axkaamta Amargooyada 20 febaraayo 1951, lamba. 5, iyo axkaamka kasta oo kale oo aan la socon karin Sharcigan.

**Qod. 9**  
**Xeerarka Taabbagelinta (hirgelinta), Isuduwidada iyo Dhammeystirka**

Xukuumadda waxaa loo wakiishay (igmaday) in ay soo saarto xeerarka taabbagelinta, isuduwidada kala-guurka iyo dhammeystirka sharcigan.

Sharcigan waxaa la gelinayaa Ururinta Rasmiga ah, ee sharciyada, waxaana lagu nashrinayaa Faafinta Rasmiga. Qof kasta, oo ku gudboon, waxa khasab ku ah in uu dhowro kuna khasbo in loo dhowro sida sharci Soomaaliya leedahay.

Taariikhda Muqdisho maanta oo ah 20 febaraayo 1958.

Maamulaha  
**Anzilotti**

Wasiirka Kowaad

iyo Wasiirka Caddaaladda

**Cabdullahi Ciise Maxamuud**